# Xoroobid

**Emancipation**


## Waa maxay xoroobida ilmahu?

Xoroobidu runtii waa kolka ilmo ka yar 18 sanno uu helo ogolaansho ah inuu gaar u noolaan karo uuna naftiisa mas'uul ka noqdo. Xoroobida macnaheedu waa waalidku waxa uu faraha ka qaadaa xaquuqdiisa ah inuu ilmaha u taliyo ilmahuna waxa uu faraha ka qaadaa xaquuqda ah in dhaqaale ahaan ay gargaaraan waalidku.

## Ciyaalka Minnesota ma xoroobi karaan?

Haa. Minnesota ilmaha ka yar 18 sanno waxaa loo tixgelin karaa inuu xoroobay. LAAKIIN, maadaama uusan sharcigu bixin hanaan la raaco si loo xoroobo, waa lagu wareeri karaa in la fahmo in laguu tixgeliyo inaad xorowday iyo in kale.

## Kolka, hadii uusan jirin hanaan, sidee ayaa ciyaalka loogu tixigelin karaa inay xoroobeen?



Waxa walbaa waxa ay ku xiran yihiin waalidka. Minnesota waxaa dhici karta in laguu tixgeliyo inaad xoroowday hadii waalidkaa ay kuu ogolaadaan inaad gaar u noolaato. Ogolaanshaha waalidka waxaa dhici karta inay ka muuqato waxa ay yiraahdaan ama ay qoraan ee ku saabsan inaad gooni u noolaato ama aad xoroowday.

Ogolaanshaha waxaa lagu cadeyn karaa hadii waalidku aysan isku dayin inaad guriga ku soo noqoto ka dib kolkii aad baxsatay ama guriga lagaa cayriyey.

## "Xoroobidu ma xalin doontaa dhibka iga haysta dhanka sharciga?

Marmarka qaarkood, dadku waxay u maleeyaan in hadii ay xoroobaan ay xoroobidu xalin doonto dhibka haysta. Laakiin, badanaa, waxyaabo kale oo la yeeli karo oo dhanka sharciyada ayaa ka fiican. Kuwani waa tusaalayaal arrintaa ku saabsan.

1. **Ninka hooyaday qaba ayaa igu tacadiya. Waxaan doonayaa inaan ayeyday la noolaado, laakiin hooyaday iima ogola taa, sidaa awgeed, waxaan rabaa inaan xoroobo.**
   Xaaladan oo kale, ilmahu runtii ma doonayo inuu gaar u noolaado oo uu naftiisa mas'uul ka noqdo. Ilmahu waxa u doonayaa in waalid loo noqdo. Maadaama uusan gurigu amaan ahayn, waxa ay doonaysaa inay ayeydeed la noolaato. Waxay is tiri hadii ay xoroowdo, waxa ay la degi kartaa ayeydeed in kastoo hooyadeed ay tiri maya. Laakiin ma ay heli

karto xoroobid waayo hooyadeed ma doonayso inay ka tanaasusho xaquuqdeeda ah inay u taliso ilmaha.


Xoroobidu ma aha wax anfacaya arrinta, waxaa jira waxyaabo kale oo ay yeeli karaan dhalinyada doonaysa inay helaan ka ilaalin tacadiga. Xaaladan oo kale, ayeeyadu waxaa dhici karta inay maxkamad tagi karto si ugu hesho amar ilaalin ilmaha ah ama amar siinaya iyadu inay ilmaha hayn karto. Gabadhu waa ay heli waxa ay rabto: qof daryeela oo aan ku tacadiyin.

2. **Hooyaday waxay i soo cayrisay asbuucii hore. Waxaan u baahnahayn inaan dhaqtar arko, laakiin dhaqtaradu waxa uu tiri, ima ay arki karto ogolaanshaha hooyada la'aantii? Waxa aan rabaa inaan xoroobo si aan u arko dhaqtarada.**
Minnesota, ilmaha aan la noolayn waalidka ama qofka sharciyan mas'uulka ah, waxa ay gaari  karaan go'aano ku saabsan daryeeladooda caafimaad la'aanta ogolaansho cid kale. Dhalinyaradu waxaa dhici karta kolkaa inay mas'uul ka noqdaan bixinta kharashka daryeelka, dhaqtarkuna waxaa dhici karta inuu go'aansado inay tahay maslaxada ilmaha in loo sheego waalidka booqashada dhaqtarka, laakiiin, dhallinyada gaarka u nool ma aha inay "xoroobaan" si ay u ogolaadaan inay helaan daryeel caafimaad la'aanta ogolaanshaha waalidka. Eeg warqadayada xogta xafidan ee
*Dhaqtar aan anigu leeyahay ma yeelan karaa hadii aan ka yarahay 18 sanno?*

Dhanka kale, dhibaatooyinka qaarkood waxaa la xalin karaa hadii aad tusto in laguu tixgeliyo inaad xorowday.  Matalan, qolo guri lahi waxaa dhici karta inay kuu diido inay guri kaa kireyso aan ka ahayn inaad u cadeyn ah inaad xoroowday. Qolada gurigu waa dhici karta inay ku qancaan oraah ay saxiixeen waalidkaa ama warqad qareen oo bayaaminaysa xaqaa'iqa iyo sharciga go'aaminaya in laguu tixgeliyo inaad xorowday.

## Kolka, Hadii la ii tixgeliyo inaan xoroobay, ma waxaan ahay qaangaar?

Maya. Minnesota waxa aad qaan gaar tahay marka aad 18 sano jirto. Sharciyada ku salaysan qofka da'diisu wali waa ay ku quseeyaan adiga, xataa hadii aad u nooshahay sidii qof aan wali qaangaaray oo xoroobay. Matalan, wali waa inaadan dibada joogin ka dib waqtiga bandowga, waxaa laguu tixgelin maqane hadii aadan iskuulka aadin, ma gadan kartid khamri ama sigaar mana codeyn kartid.



Inta badan, hadii aad xorowday, waalidkaa mas'uul kama noqonayaan markaa wixii ka dambeeya inay ku siiyaan meel aad ku noolaato, ama ay dhaqaale ahaan ku gargaaraan ama ay bixiyaan kharashyadaada. Kolkaa adiga ayaa mas'uul ka ah gargaarida noloshaada.

## Wali waxa aan qabaa su’aalo badan oo ku saabsan sida ay ii quseeyaan waxan oo dhami.

Sharcigu waa adag tahay in la fahmo. Waxa uuna ka soo qaadaa in waalidku ay mar walba qaadanayaan go’aano maslaxo u ah ilmahooda. Taa waxaa ku jira in ilmahu uu leehahay caqli uu gaar ugu noolaan karo, xataa hadii ilmahu uusan wali gaarin 18 sanno jir. Dhanka kale, waalidku ma aha inay cidleeyaan ilmahooda sharciguna waxa uu u jiraa in uu ka ilaaliyo ilmaha tacadi iyo dayac. Ilmaha aan la noolaan karin waalidkood wali waxa ay xaq u leeyihiin inay helaan meel amaan ah oo ay ku noolaan karaan, daryeel caafimaad iyo mid dhanka miyir ah iyo tacliinba.

Qareen ayaa kaa caawin kara inaad fahamto waxyaabaha sharciyan aad kala dooran karto kaana caawin kara iyana inaad gaarto hadafyadaada. Wixii caawimaad sharciga ah kala xiriir Barnaamijka Sharciga Dhalinyada (Youth Law Project) ee 612-332-1441.



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2024 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**